

# CSC

SOMALILAND CIVIL SERVICE COMMISSION

Q4 2023

# MAGAZINE

Xidhmada 2<sup>aad</sup>, Tirsiga 4<sup>aad</sup>, December 2023

| Vol. 2, No. 4, December 2023

| Hargeisa, Somaliland

**MADAXWEYNAHA  
OO LA KULMAY**  
Agaasimayaasha  
Guud

**STRATEGY  
HRMIS  
LAUNCHED**  
"Managing all Civil  
Service through one  
System"



Pension  
Management  
Information  
System

**SUCCESS STORY**  
**WAAXDA  
ARKIIFIYADA**  
Doorka Kaydinta Xogta  
Shaqaalaha Dawladda

**VALIDATION  
OF PAY &  
Grading Policy**

**LAUNCHING  
SERP  
PROJECT**

**CSC CUP FINALS 2023**

*Get Your*  
**Copy NOW!**



*Don't miss next issue!*



- ✉ [info@cscsomaliland.org](mailto:info@cscsomaliland.org)
- 🌐 [csc.govsomaliland.org](http://csc.govsomaliland.org)
- 📍 26 June Avenue, Hargeisa – Somaliland

📱 @slcsc



# TUSMADA

4TH QUARTER 2023 || ISSUE #04



KOOBKA KUBADDA CAGTA EE  
HAY'ADDA SHAQAALAHA



ON PAGE 21



ON PAGE 08



WAAXDA ARKIIFIYADA IYO  
DOORKA AY KU LEEDAHAY  
KAYDINTA XOGTA SHAQAALAHA  
DAWLADDA

02

Farriinta  
Guddoomiyaha

04

Hordhac

05

Guddoomiye ku Xigeenka  
Hay'adda Shaqaalaha oo  
Xilkii la Wareegay

10

Guddoomiyaha oo  
Tababar u soo xidhay  
Agaasimayaasha Cududda  
Shaqaalaha

12

Qaab-dhismeedka &  
Waajibaadka Hay'adda  
Shaqaalaha Dawladda



ON PAGE 06

MADAXWEYNAHA QARANKA  
SOMALILAND AYAA KULAN LA QAATAY  
AGAASIMEYAASHA GUUD EE DALKA.

14

Maamulidda  
Cabashooyinka Shaqaalaha  
Dawladda

16

Diiwaan-Gelinta  
Shaqo Qaran

17

Daahfurka Bilowga Mashruuca  
Dib-U-Habeynta iyo Kobcinta  
Maamulka Khayraadka  
Dawladda Somaliland (SERP)

24

Agaasimayaasha Guud oo  
lagaga Hadlay Nidaamka  
Casriga ah ee Maamulka  
Shaqaalaha Dawladda (HRMIS)



DAAH-FURKA NIDAAMKA  
MAAMULKA HAWLGABKA



ON PAGE 18

# OUR MISSION

Equity Ensuring equitable distribution of resources and benefits accruing from the Civil Service Commission's programmes.

01



## Vision

The vision of the Civil Service Commission (CSC) is to be a globally-recognized center of excellence offering the highest standard of public service provided by a skilled, dedicated and patriotic workforce.

02



## Mission

To provide human resource, labour relations and organizational development leadership and services which sustain and inspire public service in the Republic of Somaliland.

03



## Values

- Integrity Putting public interest above personal interest.
- Honesty Always acting with integrity.
- Objectivity Always acting fairly—making decisions based on facts /evidence.
- Impartiality Acting objectively and serving regional governments equitably.
- Professionalism Ensuring and maintaining high standards in the discharge of responsibilities and delivery of services.
- Transparency Upholding openness in all activities including provision of services.
- Patriotism Demonstrating a sense of devotion and personal identification as a citizen of Somaliland.

# FARRIINTA TIFAFTIRKA



// TIFAFTIRAHHA MAJALLADDA ROOBLE MOHAMED

## WAXA

... aanu sawir

fiican ka bixin

doonaa hiigsiga

fog ee kor

u qaadistq

shaqada iyo

shaqaalaha

dawladda.

### Akhristayaasha Qiimaha leh,

Waxa aan aad ugu faraxsanahay in aan idinku soo dhaweeyo cadadkan cusub ee majalladda Hay'adda Shaqaalaha Dawladda oo aynu kaga hadli doono maqaallo, warbixinno iyo qormooyin sawir fiican ka bixinaya shaqooyinka culus iyo horumarka la taaban karo ee ay qaranka u hayso Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu.

Majalladdani waa madal aanu ku soo bandhigno carbanaanta iyo curinta shaqaalaha dawladda. Waxa aanu ku faafinnaa sheekooyinka la xidhiidha hal-adaygga, shaqo wanaagga iyo fulinta hawlaha ee ay qaranka u hayaan, kaas oo qayb muhiim ah ka ah horumarka dalka.

Waxa aanu sidoo kale ku soo bandhignaa waraysiyo aanu la yeelano daneeyayaasha kale, annaga oo daaha ka qaadi doonna hiigsiga guud ee horumarinta shaqaalaha dawladda iyo doorka ay ku leedahay horumarinta qaranka. Majalladdu waxa ay sidoo kale soo bandhigtaa horumarka ay Somaliland ka samaysay dhinaca tiknoolajiyada, si gaar ah waxa aanu wax uga odhan doonaa Nidaamka Casriga ah ee Maamulka Hawlgabka loona yaqaano (PMIS), kaas oo ka mid ah guulaha ugu waawayn ee la gaadhay sannadkan, qaybna ka qaadan doona daah-furnaanta

“

WAXA AANU SIDOO  
KALE KU SOO BANDHIG-  
NAA WARAYSIYO AANU  
LA YEELANO

iyo dardar gelinta maamulka hawlgabka.

Sida aanu mar walba ugu taagannahay daah-furnaanta iyo xidhiidhka dadweynaha waxa caddayn u ah in Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaaluhu uu si fool-ka-fool ah ula hadlo saxaafadda, taas oo ujeeddadeedu tahay in ay dadku ogaadaan shaqooyinka ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu u hayso qaranka iyo guud ahaanba sida ay dawladda uga go'an tahay kor u qaadista maamul wanaaggu.

Waxa aanu cadadkan kugu soo dhawaynaynaa maqaallo iyo warbixinno fikir guud kaa siinaya himilada iyo hiigsiga shaqaalaha dawladda iyo hawlaha ay qaranka u hayaan.

Waxa aanu rajaynaynaa in aad cadadkan ka heli doontaan warbixinno iyo qoraallo idin xiiso geliya isla markaana xambaarsan macluumaad muhiim ah.

**Waad Mahadsan Tihiin**



Message from

# FARRIINTA GUDDOOMIYAHA



**Hannaanka istiraatiijiyadeed ee dawladda Somaliland** waxa ay si cad u qeexaysaa siyaasadaha aasaaska u ah in shaqaalaha dawladdu ay helaan mustaqbal wax ku ool ah oo la isku hallayn karo.

**Mr. KHALID JAMA QODAH**

**GUDDOOMIYAHA**

**Hay'adda Shaqaalaha**

**Dawladda**

Waxa aan si gaar ah ugu mahadcelinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, Mudane Muuse Biixi Cabdi oo aan uga mahadnaqayo kaalintiisii hoggaamineed ee uu ku lahaa samaynta iyo ansixinta Xeerka iyo Siyaasadda Hawlgabka shaqaalaha dawladda.

Tusaalaynta iyo hagidda joogtada ah ee Madaxweynaha ayaa dhalisay in uu qaranku gaadho guushan, taas oo sannadaha soo socda raad ku yeelan doonta shaqaalaha dawladda iyo qoysaskoodaba.

Ansixinta Siyaasadda iyo Xeerka Hawlgabku waxa uu daliil u yahay aqoonsiga la aqoonsaday muhiimadda ay leedahay in shaqaalaha dawladdu helan dhaqaale ay ku tiirsanaadaan iyo nasasho marka ay galaan da'da hawlgabka. Tani waxa ay cad u muujinaysaa sida ay dawladda Somaliland u tahay mid si buuxda tunka ugu qaadaysa masuuliyadda bulshadeeda, isla markaana ay tahay mid ku dhisan dadweynaha ay metesho.

Hannaanka istiraatiijyadeed ee dawladda Somaliland waxa ay si cad u qeexaysaa siyaasadaha aasaaska u ah in shaqaalaha dawladdu ay helaan mustaqbal wax ku ool ah oo la isku hallayn karo. Ansixinta siyaasadda iyo xeerka hawl-gabku waxa uu si shaki la'aan ah wax weyn uga tarayaa bedqabka shaqaalaha dawladda, isaga oo abuuraya jawi shaqo oo wanaagsan.

Hoggaaminta Madaxweynuhu waxa ay xaqiijisay halbeeg heerkiisa sarreeyo oo ay ku naalloodaan shaqaalaha dawladdu. Shaki igagama jiro in xeerkan hawl-gabku uu noqon doono mid ka turjuma dadaalka Hay'adda Shaqaalaha ee la xidhiidha hanashada hibooyinka sare.

Waxa kale oo aan jecelahay in aan u mahadnaqo dadaalka aan go'a lahayn ee ay muujiyeen xubnaha Golaha Wasiirrada, Guddida heer Wasiir ee Dib u Habaynta Shaqaalaha Dawladda, Agaasimayaasha Guud iyo Saraakiisha Hay'adda Shaqaalaha ee gacanta ka gaystay samaynta iyo dhamaystirka Xeerka iyo Siyaasadda Hawlgabka Shaqaalaha Dawladda. Dadaalkooda iyo wada shaqayntooda ayaa qayb weyn ku lahaa dhamsytirka hawshan.

WAXA AAN KU KALSOONAHAY  
IN XEERKA IYO SIYAASADDA  
HAWL-GABKU AY WAX  
KU KORDHIN DOONAAN  
JIRITAANKA IYO GUUSHA  
SHAQAALAH DAWLADDA.

Waxa aan ku kalsoonahay in Xeerka iyo Siyaasadda Hawl-gabku ay wax ku kordhin doonaan jiritaanka iyo guusha shaqaalaha dawladda.

Waxa aan mar kale idiinka mahad celinayaa sida aad mar kasta u garab taagan tihiin daryeelka shaqaalaha dawladda.

# HORDHAC

## **Milicsiga Dib u Habaynta Shaqaalaha Dawladda**

Taariikhda dib u habaynta shaqaalaha dawladdu waxa ay soo martay saddex qaybood. Sannadihii Siddeetamaadkii, deeq bixiyayaashu waxa ay taageero siiyeen dhisidda hay'adaha dawladda iyada oo la xaqiiqsada muhiimadda ay shaqaalaha dawladda u leeyihiin wax ka beddelka siyaasadaha. Sannadihii sagaashamaadkii markii shuuciyaddu burburtay waxa timid in la yareeyo doorka dawladda, laakiin taasi waxa ay keenatay natiijo aan la filaynin. Wixii ka dambeeyay dhamaadkii sagaashamaadka, deeq-bixiyayaashu waxa ay awoodda saareen dhisidda nidaamyo ku dhisan isla xisaabtan oo ay hagayaan hoggaamiyayaal fahan u leh isla markaana taageeraya dib u habaynta.

Intii ay samaysmeen dawladda casriga ahi, shaqaalaha dawladda ee dalalka soo korayaa waxa ay abuureen siyaasado ay isla markaana hirgeliyeen. Sida caadiga ah, shaqaalaha dawladda waxa loo arkaa in ay fure u yihiin maamulidda siyaasadaha iyo barnaamijyada horumarineed. Haddaba, barnaamijyada dib u habaynta shaqaalaha dawladda ee ay inta badan maal-geliyaan deeq-bixiyayaashu, waxa ay awoodda saaraan Arrimaha qaab-dhismeedka, maamulka maaliyadda iyo shaqaalaha iyo Arrimaha aasaaska u ah horumarinta Qaranka.

Meelo badan oo caalamka waxa la sheegaa in dib u habaynta shaqaalaha dawladdu aanay ka shaqayn sababo kala duwan awgood, kuwaas oo ay ka mid yihiin hannaanka dawladeed oo isku dabran, danaha dadka wada oo iska hor yimaadda, xasaasiyadda marka horaba laga qaabo is beddelka iyo iyada oo aanay jinin siyaasa-

do hagaya isbeddelladaas isla markaana lagu kormeerayo.

Somaliland sida dalalka kale ee soo koraya waxa ka shaqaynaysaa in ay abuurto shaqaale dawladeed tayadoodu sarrayso kuwaas oo Qaranka ku hagi kara horumar waara, isla markaana xaqiijin kara yoolasha qorshaha horumarinta Qaranka. Laga soo bilaabo sannadkii 2003, Somaliland waxa ay bilowday in ay dib u habayn ku samayso shaqaalaheeda dawladda kuwaas oo bixinaya adeegyo tayadoodu sarrayso dadkana u horseedaya nolol wanaagsan.

Dib u habaynta shaqaalaha dawladda Somaliland waxa ay awoodda saaraysaa kor u qaadista tayada Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyo ta Mac-hadka Tababarka Shaqaalaha Dawladda iyada oo la abuurayo siyaasadaha hawl-gabka, dib u Qaabaynta, dib u eegista hannaanka mushahar Bixinta, kor u qaadista adeeg Bixinta, tayaynta maamulka shaqaalaha iyo dib u eegista Arrimaha sharci intaba.

Waxa muhiim ah in arrintan lagu eego indho ka fog kana duwan ta ay deeq-bixiyayaashu ku eegayaan iyada oo lagu dhiirri gelinayo dawladda iyo ururrada bulshadaba in ay daraasad rasmi ah ku sameeyaan hirgelinta iyo wax ka beddelka Arrimaha khuseeya dib u habaynta shaqaalaha dawladda.

---

**[ ABDI ADEN ]**

**CSSP PROGRAMME MANAGER**

CIVIL SERVICE COMMISSION, SOMALILAND



# GUDDOOMIYE KU XIGEENKA HAY'ADDA SHAQAALAH A OO XILKII LA WAREEGAY

<< RECOMMENDED >>



Madaxweynaha Jamhuuriyadda So-  
maliland Mudane Muuse Biixi Cabdi  
ayaa dhawaan Haya'dda Shaqaalaha  
Dawladda u soo magacaabay Gud-  
doomiye ku Xigeen cusub kaas oo si  
rasmi ah xilkii ugala wareegay Gud-  
doomiye ku Xigeenkii Hore, Aamina  
Hussein Mohamoud.

Xafladda xil-wareejinta ayaa  
waxa ka soo qaybgalay Guddoom-  
iyaha Hay'adda Shaqaalaha oo  
uu wehelinayo Agaasimaha Guud  
ee Hay'adda Shaqaalaha, Agaas-  
imaha Guud ee Komishanka  
Maamul Wanaagga, guud ahaan  
shaqaalaha Hay'adda Shaqaalaha  
dawladda iyo Madax kale.

Madaxda ka soo qayb gashay  
xafladdan ayaa halkaa ka jeediyay



hadallo kala duwan oo lagu  
sagootinayo guddoomiye ku  
xigeenkii hore isla markaana  
lagu soo dhawaynayo gud-  
doomiye ku xigeenka cusub.

Guddoomiye ku xigeenka cus-  
ub ee Hay'adda Shaqaalaha  
Dawladda, Mudane Cabdillaa-  
hi Axmed waxa uu shaqooyin  
kala duwan iyo waxbarasha-  
diisiiba ku soo qaatay dalka  
iyo dibeddaba, gaar ahaan  
dalalka Masar, Turkiga, In-  
giriiska, Malaysiya iyo qaar  
kale. Waxa uu khibrad badan u  
leeyahay dhinacyada maamul-  
ka, ganacsiga iyo maaraynta  
shaqaalaha, isaga oo ku hadla  
afaf badan oo dunida ka jira.

# MADAXWEYNAHA QARANKA SOMALILAND AYAA KULAN LA QAATAY AGAASIMEYAASHA GUUD EE DALKA.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, mudane Muuse Biixi Cabdi, ayaa maanta kulan ballaadhan oo uu goobjoog ka ahaa gudoomiyaha.



**H**ay'adda Shaqaalaha Dawladdu qasriga Madaxtooyada kula qaatay agaasimeyaasha guud ee wasaaradaha ee dalka.

Kulankan oo ujeeddadiisu ahayd is xog-waraysi la xidhiidha hawlaha baaxadda leh ee ay agaasimeyaashu Qaranka u hayaan iyo sii dardargelinta shaqooyinka agaasimeyaasha guud, waxaana kulanka diiradda lagu saaray sidii loo sii laban-laabi lahaa hawlaha muhiimka ah ee ay agaasimeyaasha guud qaranka iyo bulshadaba u hayaan.

Ugu dambayntii, madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland mudane Muuse Biixi Cabdi waxa uu agaasimeyaasha guud ku bogaadi-

**MADAXWEYNUHU WAXA  
UU AGAASIMEYAASHA  
GUUD KU BOGAADIYEH  
HAWLAHA MUHIIMKA  
AH EE AY QARANKA U  
HAYAAN**

yey hawlaha muhiimka ah ee ay qaranka u hayaan iyo sida ay u yihiin mishiinka dhaq-ajiya dhammaanba hawlaha ka dhex socda hay'adaha ay masuuliyiintani ka socdaan.



**Kulanka Madaxweynaha iyo Agaasimayaasha Guud**





# SUCCESS STORY

**WAAXDA ARKIIFIYADA  
IYO DOORKA** AY KU  
LEEDAHAY KAYDINTA XOGTA  
SHAQAALAHADA DAWLADDA

**[HADIYA CALI DAA'UUD]**

HAY'ADDA SHAQAALAHADA DAWLADDA  
HARGEYSA, SOMALILAND.

■ QORAALKANI  
WAXA UU SOO  
GUDBINAYAA  
MUUQAALKA  
GUUD EE WAAXDA  
ARKIIFIYADA  
EE HAY'ADDA  
SHAQAALQAHADA  
DAWLADDA OO  
LA AASAASAY  
SANNADKII 2020 KII.

**K**aas oo loo aasaasay in uu wax ka qabto caqabadaha hor taagnaa maamulka xogta shaqaalaha dawladda. Waraysi aanu la yeelanay Hoodo Maxamuud Axmed, Agaasimaha Waaxda Arkiiyada ayaanu ku faahfaahinaynaa dhibaataada ay shaqadeeda kala kulmi jirtay inta aan la aasaasin waaxdan, waxyaalaha u qabsamay iyo mustaqbalka la higsanayo intaba.

Hoodo oo ka warramaysa dhibaatooyinka iyo caqabadaha haystay ka hort inta aan la aasaasin Waaxda Arkiiyada ayaa sheegtay in aanay jin goob lagu kaydiyo faylasha macluumaadka shaqaalaha, taas oo caqabad ku ahayd in si fudud loo helo macluumaadka la rabo iyo weliba in macluumaadka muhiimka ah la ilaaliyo. Taasina waxa ay inta badan keeni jirtay in dib u dhac ku yimaaddo marka shaqaale la dallacsiinayo amaba la beddelayo.

Sidaas darteed ayaa loo sameeyay Waaxda Arkiiyada si caqabadahaas looga gudbo iyada oo loo sameeyay goob dhexe oo ammaankeedu sugan yahay oo lagu kaydinkaro dhamaan macluumaadka shaqaalaha dawladda oo dhan.

Ujeeddada ugu muhiimsan ee tan laga lahaa ayaa ah in qof kasta oo shaqaale dawladeed ah loo sameeyo fayl u gaar ah oo ay ku jiraan dhamaan macluumaadka shakhsiga ah ee looga baahan yahay si loo xaqiijiyo sugnaanta iyo Ammaanka macluumaadka. Nidaamkani waxa uu Meesha ka saaray in macluumaadku isku khaldamaan amaba qaarkood la waayo isaga oo sidoo kale abuuray nidaam la isku hallayn karo oo lagu maamulo macluumaadka shaqaalaha.

Hoodo waxa ay sheegtay in Waaxda Arkiifiyadu ay wax weyn ka beddeshay sida ay shaqaaluhu u arkayeen maamulka xogtooda. Ilaa markii la sameeyay waaxdan, shaqaalaha loogama baahna in ay gacanta ku soo qaataan faylashooda shakhsiga ah, waxaana taas kaga filan in ay yimaadaan xafiiska arkiifiyada si loogu maamulo macluumaadkooda marka ay u baahdaan. Tani waxa ay fududaysay in shaqadii cuslayd iyada oo ka dhigtay mid nidaamsan isla markaana Meesha ka saartay in la isaga dab-qaado wasaarado iyo xafiisyo kala duwan.

Habka laba geesoodka ah ee la xidhiidha in faylasha lagu kaydiyo xafiiska arkiifiyada isla markaana laga dhigo qaar kombuyuutarka lagu kaydiyo ayaa isaguna sii fududeeyay maamulka xogta shaqaalaha dawladda. Iyada oo imika la wado in loo guuro nidaamka casriga ah ee kombuyuutarka, ayuu taasna xafiisku ka sameeyay horumar wax ku ool ah. Faylasha shaqaalaha ayaa loo kaydiyay qaab nidaamsan, iyaga oo lagu kaydiiyay magaca qofka shaqaalaha ah iyo lambar u gaar ah faylkaas oo marka loo baahdo si fudud loogu soo heli karo si looga fogaado in macluumaadkaasi lumo.

Hoodo ayaa sidoo kale ka hadashay mustaqbalka waaxdan iyada oo ay sheegtay in la samaynayo nidaam casri ah oo dhamaystiran kaas oo koobsanaya labada nooc ee faylasha shaqaalaha. Waxa la hiigsanayaa in dadka loo oggol yahay oo keli ah, kuwaas oo ku kala sugan Wasaardaha iyo hay'adaha dawladdu ay

macluumaadkaas ku arki karaan si fudud iyaga oo ka soo gelaya kombuyuutarradooda. Waaxda Arkiifiyadu waxa ay qorshaynaysaa in ay wada shaqayn la yeelato hay'adaha dawladda si loo abuurto hal nidaam oo casri ah oo ay ku wada shaqayn karaan dhamaan hay'adaha dawladdu si loo mideeyo maamulka macluumaadka shaqaalaha dawladda.

Waaxda Arkiifiyadu waxa uu horumar wax ku oolka ka sameeyay maamulka xogta shaqaalaha dawladda isaga oo kor u qaaday



Tayada maamulka isla markaana hoos u dhigay culayskii maamul ee jiray. Maamulka waaxda waxa ka go'an in ay sii wadaan kor u qaadista shaqada waaxda iyo wada shaqaynta ay la leeyihiin hay'adaha dawladda si loo xaqiijiyo mustaqbal ifaya oo uu yeesho maamulka macluumaadku. Waaxda Arkiifiyadu waxa ay u taagan tahay in ay noqoto astaanta horumarka iyo kor u qaadista Tayada maamulka macluumaadka shaqaalaha dawladda.

# Guddoomiyaha oo Tababar u soo xidhay Agaasimayaasha Cududda Shaqaalaha

Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda Mudane Khaalid Jaamac Qodax oo ay weheliyaan Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta & Tiknoolajiyadda JSL Dr. Cabdiwali Cabdillaahi Suufi iyo Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Khayraadka Biyaha Mudane Cali Xasan Maxamed ayaa soo xidhay tababar loo qabanayay Agaasimayaasha Cududda Shaqaalaha ee Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee dawladda kaas oo ku saabsanaa **Nidaamka Casriga ah ee Maaraynta Cududda Shaqaalaha loona yaqaanno (HRMIS)**. Xidhitaankii Tababarkan waxa shahaadooyin la siiyay 55 ka mid ah agaasimayaashaasi.

Labada Wasiir iyo Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ayaa ku dheeraaday muhiimadda uu nidaamkani u leeyahay maamulka shaqaalaha dawladda iyada oo tababarkanina uu qayb ka yahay hirgelinta nidaamkan oo ay Hay'adda Shaqaaluhu in muddo ahba ka soo shaqaynaysay. Gudoomiyuhu waxa uu sheegay in marka Agaasimayaashu ay tababarkan dhammaystaan ay si rasmi ah ugu shaqayn doonaan iyaga oo shaqaalaha kale ee wasaaraddahana lagu tababari doono. Hirgeinta nidaamkan Maamulka shaqaalaha dawladda







*Wasiirrada iyo  
Guddoomiyaha  
Hay'adda  
Shaqaalaha  
Dawladda ayaa  
ku dheeraaday  
muhiimadda uu  
nidaamkani u  
leeyahay maamulka  
shaqaalaha  
dawladda*



ee HRMIS waxa uu qayb ka yahay barnaamijka dib u habaynta shaqaalaha dawladda ee ay Hay'adda Shaqaaluhu hagayso kaas oo gacan weyn ka gaysan doona hufnaanta iyo daahfurnaanta hannaanka maamul ee shaqaalaha dawladda sida saacadaha shaqada, fasaxyada, shaqaalaysiinta, shaqo ka saarista, dallacaadda, iyo wixii la midka ah.

# Qaab-dhismeedka & Waajibaadka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda

## 1.1. Hordhac

Marka ugu horaysa Hay'adda shaqaalaha dawladda waa Hay'ad kamid ah Hay'addaha uu dastuurka aasaasay sida ku cad qodabka 113<sup>aad</sup> ee Dastuurka JSL.

Sidoo kale, Xeerka shaqaalaha dawladda **Xeer Lr.97/2022** ayaa noqday Xeerkii ugu horeeyay ee Baarlamaani ah ee lagu faahfaahiyo qaab-dhismeedka Hay'adda iyo Waajibaadka ay Qaranka ugu igman tahay.

Haddaba, Waaxda Arrimaha Sharciga ee Hay'adda shaqaalaha dawladda waxay maqaalkan kooban si taxanna ah ugu lafaguri doontaa qaab-dhismeedka iyo Waajibaadka Hay'adda shaqaalaha dawladda.

Sida ku cad qodabka 14<sup>aad</sup> ee Xeerka shaqaalaha dawladda **Xeer Lr.97/2022** Hay'addu waxay yeelanaysaa qaab-dhismeed ka kooban: -

- Guddoomiye oo ah Gudoomiyaha Guddida
- Guddoomiye ku-xigeenka Guddida, iyo
- Shan (5) xubnood oo ah Guddi

**Qaab-dhismeedka Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waxa kale oo uu yeelanayaa**

- Agaasime Guud oo noqonaya Xoghayaha guddida
- Waaxo iyo Qaybo
- Xafiisyada Gobolada ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.
- Machadyo Tababar.

Qodobka 15<sup>aad</sup> ee xeerka shaqaalaha dawladda waxa u ka hadlayaa Magacaabista Xubnaha Guddiga Hay'adda Shaqaalaha isaga oo sheegay in Madaxweynaha JSL uu magacaabay Xubnaha Guddida Hay'adda

Shaqaalaha Dawladda, waxaana cod hal dheeri ah ku ansixinaya Golaha Wakiilada sida uu dhigayo Qodobka 114<sup>aad</sup> farqadiisa 1<sup>aad</sup> ee Dastuurka JSL. Xil ka qaadista Xubnaha Guddida Hay'adda Shaqaalaha Dawladda waxa awood u leh oo kaliya Madaxweynaha JSL sida uu dhigayo Qodobka 114<sup>aad</sup> farqadiisa 2<sup>aad</sup> ee Dastuurka JSL.

## 1.2. Magacaabista Xubnaha guddida Hay'adda shaqaalaha dawladda waxa ku xidhan shuruud, shuruudaas oo ah:-

- In uu yahay Muslim ahna muwaadin reer Somaliland ah
- In ku sifoobay asluub & akhlaaq wanaagsan kuna dhaqmo diinta Islaamka;
- In uu leeyahay aqoon heer jaamacadeed ah haystana ugu yaraan shahaadada darajada 1aad (Bachelor Degree);
- In uu ku sifoobay xilkas toosnaan isla markaana leeyahay sifo dhexdhexaadnimo, karti iyo daacadnimo;
- In aanu ku dhicin xukun maxkamadeed oo ciqaab oo kama danbays ahi 5tii sano ee ugu danbeeyay;
- In uu leeyahay khibrad shaqo iyo waayo aragnimo aan ka yareyn 5 sanadood; iyo
- In uu maskax ahaan iyo jidh ahaanba u gudan karo xilkaas.

## **Cabdiqani Saleban Jaamac** **(LI.B, LI.M)**

Agaasimaha Waaxda Arrimaha  
Sharciga  
Hay'adda Shaqaalaha  
Dawladda



### **1.3. Waajibaadka Hay'adda Shaqaalaha dawladda**

Sida ku xusan Qodabka 13<sup>aad</sup> ee Xeerka shaqaalaha dawladda Hay'addu waxa waxay masuul ka tahay hirgelinta xeerarka iyo siyaasadaha dib-u-habaynta, maaraynta iyo maamulka shaqaalaha dawladda, iyo tayaynta aqoonta cududda shaqaalaha Dawladda.

Si gaar ah, xilka iyo waajibaadka Hay'adda Shaqaalaha waxa ka mid ah:

- a) Curinta siyaasadaha, qorsheyaasha iyo Tabaha horumarinta maamulka iyo tababarrada shaqaalaha dawlada.
- b) La socodka dhaqangalinta siyaasadaha iyo habraacyada maamulka shaqaalaha dawladda;
- c) Kormeerka iyo u kuurgalidda hab-sami u socodka shaqada iyo adeegyada ay bixiyaan shaqaalaha dawladdu;
- d) Kala talinta Madaxweynaha arrimaha la xidhiidha Shaqaalaha dawlada;
- e) Shaqaalaynta, dallacsiinta, hoos-u-dhigista iyo anshax-marinta shaqaalaha joogtada ah ee Hay'addaha Dawladda;
- f) kor u qaadida iyo tayaynta aqoonta shaqaalaha si loo hormariyo wax qabadka shaqaalaha korna loogu qaado adeegyada ay bixiyaan;
- g) Isku dubba ridka, hirgelinta siyaasadaha iyo istiraatiijiyadda ku aadan maaraynta qiimaynta xil-gudashada shaqaalaha dawladda;
- h) Fulinta daraasadaha ku saabsan horumarinta cududda shaqaalaha ee dhinacyada waxqabadka, baahiyaha, xilgudashada iyo dajinta qorsheyaasha la xidhiidha hormarinta iyo hagaajinta nidaamka shaqada ee dawladda;
- i) Dajinta barnaamijyo iyo qorsheyaal loogu talagalay in lagu dhiirigaliyo shaqaalaha dawladda.
- j) Jaangoynta iyo ansixinta qaabdhismeedka Hay'addaha dawladda.
- k) Unkidda ama aasaaska nidaam hufan oo ku saabsan dhageysiga dacwaddaha shaqaalaha iyo go'aan ka gaadhista cabashooyinka go'aannadda ay gaadhaan hay'addaha dawladda ee ku aadan cududda shaqaalaha;
- l) Dhaqangalinta tallaabooyinka kala duwan ee anshaxmarinta shaqaalaha kala duwan ee dawladda iyada oo loo raacayo sida Xeerku jideeyay;
- m) Bixinta tallooyinka kala duwan ee lagu toosinaayo hal-beegyadda kormeerka iyo qiimaynta si kor loogu qaado qorsheynta, dejinta iyo hirgelinta siyaasadaha iyo barnaamijyada adeega dadwaynaha;
- n) Samaynta daraasaadka baahida nooca tababar ee u baahan yihiin shaqaalaha dawladu sanadkasta iyo la socoshada iyo qiimaynta tayada tababarka shaqaalaha dawlada; iyo
- o) Fulinta shaqo kasta oo kale oo xerkan ama xeerar kale siiyeen.



# Maamulidda Cabashooyinka Shaqaalaha Dawladda



**D**awladda Somaliland wuxuu ka taagan yahay in uu iskaashi u wado shaqaalaha adeegga sare ee madaxbannaan, waxaana lagu talagalay in la abuuro isfaham wanaagsan iyo in loo helo xal u helidda matalidda iyo sharraxaadka shaqaalaha dawladda.

Xaaladda sharciyada ah, shaqaalaha waa inay bixiyaan macluumaad muhiim ah oo loo baahan yahay in shaqaale lagu soo bandhigo ama isu gudbo matalid, iyadoo xadka sharciyada lagu xiro. Macluumaadka ku saabsan xaaladda matalidda iyo hawlaha la xiriiira waa in la soo waco shaqaale. Ka dib markii la soo waco, shaqaale waxay heli karaan koob aan matalidka ahayn ee sharci (Annexure 1: Form 15.1). Sidoo kale, shaqaale waxay leeyihiin xaquuqda inay soo jeediyaan CSC (Guddiga Adeegga Sare) iyo sidaas darteed ku guulaysatay maamulka sharciga iyo xallinta matalidda.

**Shaqaale waa inay bilowdaan matalid aan maqalno ugu dambayn 10 maalmood ka dib markii xaaladda dhacay. Kadib markii daafaca, Maamulaha wasaaradda wuxuu kulan la qaatay shaqaale si uu u wada hadlo mataliddooyinka la soo jeediyay, iyadoo loogu talagalay inuu fahmo natiijada loo baahnaa iyo inuu helo xal lagu kalsoonaado shaqaale.** Maamulaha wuxuu qaabab ka qaadasho, oo ay ka mid tahay falcelin xog ah oo ku saabsan xaaladda, iyadoo la isku dayo in la kala hadlo shaqaale kale ee shaqaaleada maamulka ah.

Ka dib markii la isku dayo, maamulaha wuxuu soo xidhiidhaysaa shaqaale natiijooyinka matalidda 7 maalmood ka dib markii kulanka ugu horreeya. Haddii khilaafka la sii kordho, maamulaha wuxuu kusoo jeedaa inuu dib u eegisyo wada hadalka, kulan loo bixinayo ka dib markii la iskudaynayo. Haddii dib u eegis lagu kordhinayo, shaqaale wuxuu la xidhiidhsan karaa matalid, oo dhaqaale loo filanayo, iyadoo kulankaasi ka dhici karaan 10 maalmood ka dib markii la soo waco matalidka.

Haddii shaqaaluhu dhammaan kala joogayaan, matalidka wuxuu sii kordha isticmaalayaan inay mar walba ku soo xidhaan foomka matalidka (Annexure 1: Form 14 Stage 1); ilaa maamulaha wasaaradda, ama haddii maamulaha yahay kan la mataliyo, ama kan la casuuma. Ka dib markii la xidho, maamulaha wuxuu eegaya xaaladda matalidda sida sharciga loo baahanyahay, oo inta badan uu u xoojiyaa shaqaale. Haddii sharcigaasi lagu dhammeeyo, maamulaha wuxuu ku war-geliya shaqaaleyaal in matalid lagu ogaado, waxaana lagu siiyaa xogtan matalidda qorshaha matalidka lagu sameeyo. Haddii sharcigaasi lama dhammeeyo, maamulaha wuxuu shaqaaleyaasha soo waco inuu sharci aanad lahayn oo ku saabsan xaaladda. Haddii shaqaaluhu xog ogaalayaan, maamulaha wuxuu ku war-geliyaa shaqaaleyaal in matalidka uu furmi doono, isagoo shaqaaleyaal ugu ballanqaaday inay kulan ku yeelan doonaan matalidka 10 maalmood ka dib markii la soo waco. Haddii shaqaaluhu ka kulmaan, maamulaha wuxuu ka dhigi doonaa matalid, waxaana laga soo saari doonaa xiriirka kulanka si shaqaale loogu garsooro. Wasaaradda HR wuxuu soo saari doonaa qoraal ah oo ka kooban khudbadda dhammaystirka ee dhamaan shaqaalaha loo soo jeediyay, oo waxaa loo soo saarayaa ugu yaraan 5 maalmood ka hor kulanka. Maamulaha wuxuu ku dhameystirayaa matalidka, waxaana laga soo saarayaa xogtan kulankan si shaqaale loogu kalsoonaado. Maamulaha wuxuu siinayaa shaqaale xilligooda inuu eego caddaaladda iyo fikirka sharciga. Xal

loo yiri maamulaha, sababaha, iyo waxa laga filan karo ayaa lagu soo saarayaa Maamulaha Guud ee Wasaaradda (Director General) si uu uga hor keenayo. Maamulaha Guud wuxuu dib u eegisay, waxaana lagu soo saarayaa dhamaan shaqaaleyaasha dhinaca kala duwan si uu uga hortago matalidka 10 maalmood ka dib markii la soo waco. Shaqaale waa inay la wadaagaan warqad ku saabsan xaquuqda iskaashi.

Hadii xanuunku sii kordho, shaqaale wuxuu kusoo dhamaan kordhintii matalidka. Shaqaale wuxuu soo gudbiyaa warqad ku saabsan xaaladda matalidda (Annexure 1: Form 15.1) Maamulaha Guud ama haddii uu yahay maamulaha la mataliyo, ama ilaa maamulaha sare ee ugu sarreeya. Ka dib markii la soo gudbiyo, maamulaha wuxuu eegaya shaqaaleyaasha iyadoo uu isaga bixiyo hababka qorshaha matalidka iyo qof walba oo muhiim ah oo ay ka mid yihiin shaqaalaha.

Matalidka ku saabsan xanuunka lahayd, maamulaha wuxuu bilowgaan kormeer xiriirka kulanka, kula kulmiya shaqaale si uu u wada hadlo matalidada, isaga oo loogu talagalay inuu fahmo natiijooyinka loo baahnaa iyo inuu helo xal loo kalsoonaado shaqaale. Maamulaha wuxuu qaabab ka qaadasho, oo ay ka mid tahay falcelin xog ah oo ku saabsan xaaladda, iyadoo loogu talagalay inuu ogaado haddii buuxinta shuruudaha, isagoo soo bandhigaya midkood oo la siiyay shaqaale. Haddii shuruudahaasi lama buuxin, maamulaha wuxuu ku sheegaya shaqaaleyaasha in matalid loo soo jeediyay, waxaana lagu siiyaa muhiimadda matalidka qorshaha (Annexure 1: Form 14: Stage I) iyo macluumaadka dheeraadka ah ee shaqaaleyaasha. Haddii shuruudahaasi lama buuxin, maamulaha wuxuu ku sheegaya shaqaaleyaasha inay ku ogaadaan shuruudaha saaran ama xalal kale oo loo baahanyahay. Haddii matalidku aanay ahayn mid ka mid ah cudurka, maamulaha wuxuu u sheegaya shaqaaleyaal in matalidka lama odhanayo, oo uu gudbiyo shaqaaleyaal shaqaalaha ah inay soo bandhigaan isticmaalka shaqaalaha.

Haddii shaqaaluhu dhammaan kala joogayaan, maamulaha wuxuu ku sheegaya in uu talaabooyin qaadi doono inay dhammaan kala joogto. Haddii xiliga loo baahdo inay dhammaan kala joogto, shaqaale wuxuu ku soo bandhigaa warqad ku saabsan xaaladda matalidda, kuwaas oo lagu

sheegayo shaqaaleyaasha in lagu guulaysan doono. Ka dib markii warqaddu la soo bandhigayo, maamulaha wuxuu u sheegaya shaqaaleyaasha in matalidka loo bixiyo, waxaana lagu soo saarayaa tafsiirka xaaladda shaqaalaha, khudbadda shaqaale, iyo warbixin kale oo kasta oo loo baahanyahay. Maamulaha wuxuu la xidhiidhi karaa shaqaaleyaasha sidii uu u qeexi lahaa xaaladda, soo bandhigga shuruudaha, iyo helitaanka xal loo baahanyahay. Warqadda xidhiidhiga ee xaaladda iyo shaqaaleyaasha, iyo dhammaan warbixintooda, waxay la socdaan si shaqaale loogu horumariyo. Maamulaha wuxuu sheegaa shaqaaleyaasha habka ugu horeeya ee dhexdhexaadinta matalidda. Warqadda warqadda wuxuu u sheegaya shaqaaleyaasha xaaladda matalidda, sababaha laga qabsanayo, go'aanka, sababta go'aanku yahay, iyo waxyaabo kale oo ka soo baxaya go'aankiisa.

Maamulaha wuxuu ku soo bandhigaa shaqaaleyaasha warqad shaqsi ah oo sheegaya inay xaqiijinayaan qorsheyaasha, talaabooyinka, iyo sababaha lagu xalayo. Shaqaale wuxuu heli karaa muddo labaatan maalmood ka dib markii la soo gudbiyo warqadda soo bandhiga, halkaas oo loo oggolaaday in la kulmo. Kulankaasi waxaa ka mid ah in la ogaado xaaladda matalidda ee hadda socota, dib u eegida qaybinta go'aanka hore, iyo saadaasha xalinta. Shaqaale wuxuu la siinayaa fursad inuu sheego matalidkiisa, kana shaqeeyo shaqaale kale oo ka shaqeeya Wasiirka Ama Diiwaan-gelinta. Hawlaha talaabada ah ee loo baahan yahay hawlo sharciga iyo maareynta maamulaha. Shaqaale wuxuu la oggolaaday inuu qorsheyo isticmaalka shaqaalaha. La xidhiidhaa shaqaalaha iyo maamulaha inay kala soo bandhigaan hababka lagu shaqeeyo. Bulshada iyo xeerarka dalka waa inay si wanaagsan iskaashi uga shaqeeyaan, isla markaana waxyeelo ku hagaagaan shaqaalaha adeegga sare.

Haddii shaqaaluhu kulaalayaan tallaabooyinka talaabada ah, waxaa ay ka mid yihiin taageero iyo guul. Dawladda Somaliland waxay leedahay kalsooni darro iyo taageero siyaasadeed oo ay ku guulaysato inay soo saaraan xaaladaha shaqaalaha.

**[ FARDUUS SICIID DIRIR ]**  
**HAY'ADDA SHAQAALAHAWLADDA**  
**HARGEISA, SOMALILAND**

# DIIWAAN-GELINTA SHAQO QARAN



*Shaqaalaha Shaqo Qaran waxa ay ka hawl-geli doonaan hay'adaha dawladda ee dalka oo dhan.*

**W**axaa si rasmiya uga furmay Hoolka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda hubinta & Diwaangelinta Shago-qaran Duf cadda Aad Ga Gaar ahaan Gobolka Maroudi-jeex

Waxa kormeer ku soo maray Gudoomihaya Hay'adda Shaqaalaha Dawladda Mudane Khalid Jaamac Qodax oo ay weheliyaan Gudoomiye Xigeenka HSHD Aamina

Xuseen Maxamuud iyo Guddida Loo Xil-saaray Diiwaan galinta.

Gudoomiyaha ayaa warbixin ka siiyay Tilifishanka Qaranka isaga oo waraystay dhallinyaradda shaqo qaran qaabka loogu adeegayo.



# Daahfurka Bilowga

## MASHRUUCA DIB-U-HABEYNTA IYO KOBICINTA MAAMULKA

Khayraadka Dawladda Somaliland (SERP)



**G**uddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda Mudane Khalid Jama Qodax ayaa ka qayb galay daahfurka bilowga mashruuca Dib-u-habeynta iyo Kobicinta Maamulka Khayraadka Dawladda Somaliland oo loo soo gaabiyo SERP [Somaliland Enhancing Public Resource Management]. Mashruucan oo uu maalgalinayo Bangiga Aduunku waxa uu socon doonaa muddo shan sannadood ah kaas oo ay fulinayso dawladda Somaliland.

Munaasabadda daahfurka oo ka qabsoontay hotel Ambassador ee magaalada Hargeisa, waxa ka soo qaybgalay madax ka socota xukuumadda Somaliland iyo saraakiil ka socota daneeyayaasha mashruucan.

Mashruucan ayaa wax ka tari doona kor u qaadista iyo tayaynta nidaamka maamulka khayraadka dawladda iyada oo Hay'adda Shaqaaluhuna ay gacan ka gaysan doonto daah-furnaanta iyo isla xisaabtanka maamulka dhaqaale ee dalka.



**Daah-furkani waxa uu muujinayaa dardar gelinta wada shaqaynta, daah-furnaanta iyo hufnaanta maamulka dhaqaalaha dawladda.**

# DAAH-FURKA NIDAAMKA MAAMULKA HAWLGABKA

(PMTS)



***Kulan lagu daah-furayay Qiimaynta iyo Qaabaynta Nidaamka Casriga ah ee Maamulka Xogta Shaqaalaha Hawlgabka ka qabsoomay hoolka shirarka ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.***

**K**ulankankaasi oo uu si rasmi ah uu u furay Wasiirka Wasaaradda shaqo-gelinta, Arrimaha bulshada iyo qoyska iyo Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ayaa waxa ka soo qaybgalay Agaasimayaasha Guud ee qaar ka mid ah Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda iyo masuuliyiin kale.

Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha ayaa halkaas kaga hadlay muhiimadda uu

nidaamkani u leeyahay qaranka gaar ahaan shaqaalaha hawlgabka iyo in nidaamkani uu qayb ka yahay xeerka iyo siyaasadda hawlgabka ee dhawaan ay Golaha Wasiiradu ansixiyeen. Guddoomiyuhu waxa uu u mahadnaqay cid kasta oo ka soo shaqaysay hawshan haddii ay noqoto mid farsamo ama mid maamulba.



Wasiirka Wasaaradda Shaqo Gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska ayaa isaguna ku dheeraaday muhiimadda uu leeyahay nidaamka hawlgabka qaranku iyo in ay tani tahay tallaabo hore loogu qaaday dhinaca dawladnimada maadaama aynu yeelanay nidaam hawlgab oo rasmi ah.

Waxa uu Wasiirku masuuliyiintii halkaa joogtay ku boorriyay in ay kala shaqeeyaan Hay'adda Shaqaalaha sidii nidaamkaas loo hirgelin lahaa.

Masuuliyiinta kale ee halkaa ka hadashay ayaa sheegay in tani ay tahay fursad qaali ah

oo u baahan in laga faa'idaysto. Khubarrada kala shaqeyn doontaa Hay'adda nidaamkan casriyeynta Hawlgabka ayaa iyaguna madasha ka hadlay kuna dheeraaday inay si hagar la'aan ah hawshaasi u fulin doonaan.

Nidaamka Casriga ah ee Maamulka Xogta Shaqaalaha Hawlgabku waxa uu noqonayaa ka ugu wayn ee xagga maamulka Hawlgabka si loo gaadho ujeeddooyinkii laga lahaa, waana mid ku dhisan hannaanka Tiknoolajiyada Casriga ah, kaas oo ku xidhan xog-kaydiye loogu talagalay.



“

NIDAAMKANI WAA  
MID KU DHISAN  
HANNAANKA  
TIKNOOLAJIYADA  
CASRIGA AH, KAAS  
OO KU XIDHAN  
XOG-KAYDIYE  
LOOGU TALAGALAY.





# SHIRKA AGAASIME WAAXEEDYADA

## HAY'ADDA SHAQAALAHA DAWLADDA

**W**axa hoolka shirarka ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ka qabsoomay shirkii joogtada ahaa ee maamulka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.

Kulankan oo uu guddoominaya Agaasimaha Guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda **Khalid Mirre Nouh** ayaa waxa lagaga hadlay waxa ka mid ahaa:

Warbixin ku saabsan Qodobadan hoos ku xusan:-

1. Nidaamka Casriga ah ee Maaraynta Cudduda Shaqaalaha loona yaqaano (HRMIS)
2. Fulinta Meelaynta Shaqaalaha Shaqo-qaran.
3. Iswaafajinta xeerka shaqaalaha dawladda iyo Habraacyada.
4. Fulinta Siyaasadda Mushaharbixinta iyo qaabaynta darajooyinka Shaqaalaha dawladda.

5. dib u eegista iyo qiimaynta qorshe-hawleedkii HSHD.

6. Dib-u-habaynta Xogta Xaashida Mushahar Bixinta

dib u eegista iyo qiimaynta hawl-qabadka qabsoomay kaas oo lagu lafaguray wixii qabsoomay wixii aan qabsoomin iyo wixii caqabado ah ee ka hor yimid.

Agaasimaha Guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ayaa isaguna sharraxaad ka bixiyay muhiimadda ay leedahay joogtaynta dabagalka hawl-qabadka isaga oo u mahad celiyay cid kasta oo fulisay qorshaheedii hawl-qabadka kuna qabatay muddadii loo qorsheeyay. Ugu dambayn, waxa shirka si rasmi ah u soo xidhay Agaasimaha Guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda, isaga oo kula dardaarantay masuuliyiinta shirka ka soo qayb gashay sidii loo xoojin lahaa la xisaabtanka shaqaalaha isla markaana la joogteeyo kormeerka iyo sugnaanta hawl-qabadyada shaqaalaha dawladda.





## KOOBKA KUBADDA CAGTA EE HAY'ADDA SHAQAALAH

**K**oobka kubadda Cagta ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ayaa beryahanba ka socday magaalada Hargeysa, kaas oo ay ku tartamayeen dhamaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee dawladda ayaa ku soo dhamaaday si guul ah.

Is reeb-reeb dheer ka dib, waxa ugu dambayn koobka isugu soo hadhay xulalkii ka kala socday Hay'adda Shaqaalaha

**HAMBALYO XULKA  
WASAARADDA  
HORUMARINTA BIYAHA  
OO KU GUULAYSATAY  
KOOBKA**

Dawladda iyo Wasaaradda Horumarinta Biyaha, halkaas oo ay Wasaaradda Horumarinta Biyuhu ku guulaysatay koobkii.

Ujeeddada tartanka ayaa ahaa in la abuuro jawi wada shaqayneed iyo adkaynta xidhiidhka shaqaalaha dawladda ee ka kala shaqeeya wasaaradaha kala duwan.

“

**Hambalyo xulka  
wasaaradda  
horumarinta biyaha  
oo ku guulaysatay  
koobka**





# SHIRKA KA DANEYAYAASHA

Mashruuca dib u habaynta  
shaqaalaha iyo dib u cusboonaysiin  
tababarka nidaamka caalamiga ah  
ee bay'adda iyo bulshada



## Qodobbada ugu waayayn:

Warbixinta mashruuca,  
Tababarka Deegaanka  
iyo Arrimaha Bulshada,  
Wacyi Gelinta hannaanka  
cabashooyinka, soo bandhigidda  
Siyaasadda Arrimaha bulshada  
ee Wasaaradda Qoyska.





Shirka daneeyayaasha barnaamijka dib u habaynta shaqaalaha dawladda iyo dib u cusboonaysiin tababarka nidaamka caalamiga ah ee ilaalinta deegaanka iyo bulshada ayaa ku qabsoomay xarunta Wasaaradda Qoyska iyo Arrimaha Bulshada taariikhtu markay ahayd 11 December 2023.

Shirkan waxa ka qaybgalay qaar ka mid ah daneeyayaasha wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda, iyo mas'uuliyiin ka socda Wasaaradda Qoyska iyo Arrimaha Bulshada, Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyo khubaro ka socota barnaamijka dib u habaynta Shaqaalaha Dawladda. Madaxa barnaamijka ayaa iftiimyey wax qabadyadii ugu muhiimsanaa ee Hay'adda shaqaaluhu fuliso. Sida Siyaasadda Xaqsiinta Hawl gabka shaqaalaha dawladda, Nidaamka Maareynta Shaqaalaha dawladda (HRMIS), iyo Siyaasadda Mushahar Bixinta.

Ka qaybgalayaasha shirkan ayaa halkaa kaga hadlay arrimo muhiim ah oo ay ka mid yihiin cusbooneysiinta tababarrada ku saabsan nidaamka caalamiga ah ee ilaalinta deegaanka iyo Bulshada (ESF), maaraynta iyo xallinta khilaafaadka (GRM). Wasaaradda

Shaqo Gelinta ayaa sidoo kale iyaduna ka hadashay Siyaasadda Daryeelka Bulshada dhowaan la ansixiyey.

Shirka waxa ka soo baxay qodobbo ay ka mid yihiin iskaashi iyo faham ku saabsan dardar gelinta nidaamka caalamiga ah ee deegaanka iyo bulshada, taas oo Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ugu talagashay in lagu horumariyo Adeegyada Shaqaalaha Dawladda.

Ugu danbayntii waxa lagu soo gunaanaday muhiimada ay leedahay iskaashiga iyo wada shaqaynta daneeyayaashu. Waxa kale oo halkaa ka hadlay Agaasimaha guud ee Wasaaradda Qoyska iyo Arrimaha Bulshada oo isna iftimiyey muhiimada shirku leeyahay iyo ahmiyada ay siinayaan wada shaqaynta Hay'adda Shaqaalaha iyo daneeyayaashaba.

Tababarkan waxa bixinayey khabiirad Hay'adda Shaqaalaha u qaabilsan horumarinta arrimaha bulshada. Halkaas lagu guudmaray Nidaamka caalamiga ah ee ilaalinta deegaanka iyo bulshada (ESF) iyo Maaraynta iyo xalinta khilaafaadka Casriga ah (GRM).



**Shirka Guddida Farsamo ee**  
**Agaasimayaasha Guud**  
**oo lagaga Hadlay**  
**Nidaamka Casriga**  
**ah ee Maamulka**  
**Shaqaalaha Dawladda**  
**(HRMIS)**

---





“

## FULINTA SIYAASADAHA SIDA MUSHAHAR BIXINTA IYO HAWLGABKA

”

Shirka Guddida Farsamo ee Agaasimayaasha Guud oo ka qabsoomay hoolka shirarka ee Hay'adda Shaqaalaha oo uu guddoominayay Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ayaa lagu soo bandhigay Nidaamka Casriga ah ee maamulka shaqaalaha dawladda loona yaqaano HRMIS. Guddoomiyaha ayaa halkaa kaga hadlay doorka muhiimka ah ee ay Agaasimayaasha Guud ku leeyihiin dib u habaynta shaqaalaha dawladda, gaar ahaan higelinta nidaamkan casriga ah.

Guddoomiyuhu waxa uu warbixin kooban ka siiyay shirka hannaanka uu soo maray samaynta nidaamkani iyo sida uu isticmaalkiisu muhiimka ugu yahay Agaasimayaasha Guud. Guddoomiyuhu waxa uu sheegay in shirka kan xiga lagaga hadli doono arrimo ku saabsan higelinta siyaasada Mushahar Bixinta iyo Hawlgabka shaqaalaha dawladda.

Agaasimaha Waaxda ICT iyo khabaro ka socota shirkadda SAHAL Tech ayaa iyaguna halkaa ku soo bandhigay qaabka uu u shaqaynayo Nidaamka HRMIS, qaybaha uu ka kooban yahay iyo sidoo kale jadwalka dhamaystirka Nidaamka. Agaasimayaasha Guud ayaa dood iyo fikir ka dhiibtay nidaamkan HRMIS kuwaas oo la xidhiidhay cidda awoodda u leh maamulka Nidaamka, qaabka looga faa'idaysan karo in lagu kala saaro xirfadaha shaqaalaha dawladda iyo arrimo kale.

Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha oo si rasmi ah u soo xidhay shirka ayaa uga mahadnaqay Agaasimayaasha Guud sida ay wakhtigooda ugu soo hureen shirka iyo doodaha ay soo jeediyeen intii shirku socday.



# Doorka Isku Xidhayaasha

## Mashaariicdu ay ku leeyihiin

### Fulinta Mashaariicda

**I**sku xidhayaasha Mashaariicdu waxa ay door muhiim ah ka ciyaaraan sidii loo fulin lahaa mashaariicda kala duwan meel kastaba ha ahaatee. Waxa ugu muhiimsan ee ay qabtaan waa xaqiijinta in dhamaan shaqooyinka loo qorsheeyay mashruucu ay u fulaan sidii loogu talaglay iyo weliba wakhtigii loo qoondeeyay. Masuuliyadaha isku xidhayaasha mashaariicdu waxay ku kala duwan yihiin hadba nooca uu yahay mashruuca la fulinayaa.

Marka la dejinayo qorshaha mashaariicda, isku xidhayaashu waxa ay si dhow ula shaqeeyaan daneeyayaasha mashruucaas si ay u dejiyaan ujeeddada mashruuca, xayndaabka uu ku shaqaynayo, iyo weliba in loo rogo qorshe-hawleed dhamaystiran oo qeexaya muddada, hadafyada iyo dhaqaalaha loo baahan yahay intaba. Marka uu mashruucu socdo, isku xidhayaashu waxa ay qayb laxaad leh ka qaataan helista dhaqaalaha ku baxaya, kaas oo si habboon loogu qaybinayo shaqooyinka la qabanayo, shaqaalaha iyo agabka lagu fulinayo mashruuca. Sidaa si la mid ah, waxa ay isku xidhaan hawl-wadeennada iyo daneeyayaasha si Hawlaha mashruucu ugu qabsoomo sidii la rabay.

Isku xidhayaashu waxa kale oo shaqadooda ugu muhiimsan ka mid ah in ay sameeyaan kormeer iyo qiimayn joogto ah inta mashruucu socdo, kaas oo lagu ogaanayo waxyaalaha qabsoomay iyo hadba sida loo fuliyay shaqooyinkii la qorsheeyay. Waxa ay sidoo kale qiimeeyaan isla markaana maamulaan khataraha ay suuragal tahay in



ay wax yeesho fulinta mashruuca, iyaga oo markaa dejinaya qorshihii lagaga hor tegi lahaa khatarahaas amaba wax lagaga qaban lahaa. Warbixinaha kala duwan ayaa iyaguna ka mid ah shaqada isku xidhayaasha kuwaas oo ay si joogto ah ugu gudbiyaan cidda ay khusayso iyo daneeyayaashaba si ay ula socodsiiyaan halka ay hawluhu marayaan mar kasta. Waxa ay iyadana ka shaqeeyaan kor u qaadista aqoonta iyo xirfadda dadka mashruuca ka shaqaynaya si loo xaqiijiyo in mashruucu guulaysto. Marka mashruucu dhamaanayo waxa ay awoodda saaraan in ay kaydiyaan xogta ku saabsan mashruuca, guulihii laga gaadhay iyo casharrada laga bartay si ay ugu dabbaqaan mashaariicda dambe.

Isku xidhayaasha mashaariicdu waxa ay udub dhexaad u yihiin qorshaynta, isku xidhka iyo kormeerka wax kasta oo mashruuca la xidhiidha, iyaga oo xaqiijinaya in mashruucu u fulay sidii loogu talagalay, isla markaana uu xaqiijiyay ujeeddadii laga lahaa.



# HAY'ADDA

Shaqaalaha Dawladda  
Civil Service Commission

# ENGLISH

version



# CONTENT

4TH QUARTER 2023 || ISSUE #04



CSC FOOTBALL  
CUP



ON PAGE 49



ON PAGE 36



TRANSFORMING EMPLOYEE DATA  
MANAGEMENT: THE ARCHIVES  
DEPARTMENT'S IMPACT ON  
GOVERNMENT EMPLOYEE RECORDS



Message from  
**THE CHAIRMAN**



Foreword



The Deputy Chairman  
of The Civil Service  
Commission Takes Office



HRMIS Training for  
HR Directors  
Concluded



Structure and the  
Mandate of the Civil  
Service Commission



ON PAGE 34

SOMALILAND PRESIDENT MEETS WITH  
DIRECTOR GENERALS OF THE MDA'S



Civil Service Complaints  
& Grievance Management



National Service  
Registration



Launching of Somaliland  
Enhancing Public Resource  
Management (SERP) Project



Technical Committee  
Meeting: Navigating HRMIS  
Implementation for Civil  
Service Advancement



PENSION MANAGEMENT  
INFORMATION SYSTEM



ON PAGE 46



# EDITOR'S NOTE



// EDITOR ROOBLE MOHAMED

# WE

... are shedding  
light on the  
broader vision  
for strengthening  
the Civil Service  
and it's pivotal  
